



## Ilaahay casa wajala wuxuu idinka reebay inaad ku dhaarataan aabayaashiin

Cumar Binu Khaddaab- Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu yiri: "Ilaahay casa wajala wuxuu idinka reebay inaad ku dhaarataan aabayaashiin", Cumar baa yiri: wallaahi kuma dhaaran tan iyo markii aan reebida ka maqlay Rasuulka -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- ha ahaato u la kac ama midaan qof kale ka soo wariyaye.

[Xadiis Saxiix ah.] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee wuxuu sheegay- in Ilaahay reebay in lagu dhaarto aabayaasha, qofkii doonaya inuu dhaarto yaanu ku dhaaran cidan Ilaahay ahayn oo yaanu ku dhaaraan Ilaahay qayrki. Ka dib Cumar Binu Khaddaab ayaa sheegay inuusan ku dhaaran aabihii ilaa markii uu reebida ka maqley Nabiga naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee, si u la kaca ama mid aan qof kale oo ilaahay qayrki ku dhaartay ka soo wariyaye.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/2945>

